

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Tallaalka Wajiga 1a ee COVID-19 iyo Adeegyada I/DD

Tallaalka COVID-19 ayaa dhawaan la heli doonaa. Tallaalku waa aalad muhiim ah oo lagu joojiyo cudurka baahsan. Haddii dadku filan la tallaalo, ka dib markaa COVID-19 waxaa joogin doonta in uu ku faafo qof ilaa qof kale. Laba ka mid ah tallaalka COVID-19 ee waqtigan la joogo la oggolaaday, Pfizer iyo Moderna, ayaa boqolkiiba 95 ah kuwo waxtar leh waana la tijaabiyay.

Qaado waqti aad dadka aad ku kalsoon tahay iyo dakhtarkaaga ku weydiiso su'aalaha aad qabto ee ku saabsan qaadashada tallaalka, si aad u go'aansan karo oo aad diyaar u noqon karto marka la heli tallaalka. Xaashida xaqiiqada ayaa tilmaamaysa waxyaabo muhiim ah oo ay tahay in tixgelin la siiyo oo ku saabsan tallaalka COVID-19. Waxaad sidoo kale xaashidan xaqiiqada u isticmaali kartaa in aad dadka kale kala hadasho tallaalka.

Goorma ayaa tallaalka la heli karaa?

Tallaalka COVID-19 waxay noqon doonaan mid ay marka u horeysa heli karaan dadka uu sida badan u soo gaaray COVID-19, sida shaqaalaha isbitaalada, iyo kuwa ay u badan tahay in ay qabaan dhibaatooyin halis ah ama u dhintaan COVID-19.

[Qorshaha Isku xigsiinta Tallaalka 1a ee Oregon](#), dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo daryeel bixiyayaashooda ayaa mudnaanta la siiyay sababta oo ah soo gaarista cudurka ee marka ay bixinayaan daryeelka, iyo halista sare ee uu u leeyahay dadka qaba I/DD.

Mas'uuliyiinta caafimaadka bulshada ayaa saadaalinaya in tallaalka COVID-19 ee la helayo ee loogu talagalay nidaamka I/DD uu yahay sida soo socota:

- Kooxda 2 (ka socota 1a): Dadka degan guryaha daryeelka ilmo korsiga iyo guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee I/DD iyo shaqaalaha ka tirsan goobahani.
- Group 3 (ka socota 1a): Kuwa ku nool guriga ee la kulma xaalad caafimaad ama naafanimada ee u baahan shaqaalaha taageerada ee dibada si ay adeegyada ugu bixiyaan guryahooda dhexdooda. Sidoo kale, Shaqaalaha Daryeelka Shakhsiyeed (PSW) iyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah ee bixinaya taageerooyinka guriga iyo adeegyada maalintii.

Waa maxay COVID-19 maxayse yihiin halisaha ka dhalan kara haddii aan qaado?

COVID-19 waa cudur keenaya faafitaan baahsan. Waa fayras noqon kara mid fudud, sida hargabka caadiga ah ama hargabka daran 'flu' laakiin wuxuu mararka qaarkood keeni karaa jiro daran iyo xataa dhimasho.

Maxay yihiin faa'iidooyinka qaarkood ee uu leeyahay Tallaalka COVID-19?

Tallaaladu waxay bixiyaan difaac lagaga hortagayo in la qaado cuduro halis ah. Tallaaladu waxay sidoo kale gacan ka geystaan ilaalinta asxaabteena, deriskeena iyo bulshooyinkeena iyaga oo hoos u dhigaya tirada dadka qaadi kara cudurada. Marka dadku filan la tallaalo, cuduradani waxay u badan tahay in joojiyaan faafitaanka.

- Tallaalada hadda jira ee COVID-19 ayaa muujiyay in yihiin kuwo waxtar u leh ka hortagga faafida cudurka COVID-19.
- Tallaalku waa aalad muhiim ah oo lagu joojiyo cudurka baahsan ee COVID-19. Tani waxay sahli doontaa in lagu soo laabto hawlihii aanu dhammaanteen joojinay tan iyo markii uu cudurka baahsani bilaabmay.

Maxay yihiin raadadka qaarkood ee uu leeyahay Tallaalka COVID-19?

Waa in aad la hadashaa dhakhtarkaaga ka hor inta aadan qaadan tallaalka COVID-19. Waxaad u baahan doontaa in aad ogaato in daryeel bixiyahaaga caafimaadku ku talinayo in aad qaadato tallaalka iyo in kale marka uu yahay mid aad adigu heli karto.

Tallaal bixiyahaaga kala hadal wax ku saabsan xaaladahaaga caafimaad oo dhan.

Raadadka laga soo sheegay tallaalada COVID-19 waxaa ka mid ah xanuun laga dareemo meesha la iska tallaalo, daal, madax xanuun, muruq xanuun, qarqaryo, xanuunka kala goyska, qandho, bararka meesha la iska tallaalo, guduudashada meesha la isla tallaalo, lalabo, dareemida caafimaad darro, iyo bararka qanjidhada.

Miyay tahay in aan qaato tallaalka?

- Qaadashada tallaalka COVID-19 waa ikhriyaar aad adigu leedahay. Ma jiro shuruudaha ka socda ODDS oo ah qaadashada tallaalka COVID-19.

Ayaa iga caawin kara go'aan ka gaarista qaadashada tallaalka iyo in kale?

- Adiga (ama mas'uul haddii aad leedahay mid) ayaa go'aansan doona qaadashada tallaalka iyo in kale.
- Waxaad adeegsan kartaa xubno ka tirsan qoyska, asxaab ama xirfadlayaal lagu kalsoon yahay (sida daryeel bixiyaha caafimaadka) oo loogu talagalay taageerada si go'aan loo gaaro.

- Waxaad mar kasta weydiin kartaa su'aalo dheeraad ah, codsan kartaa in macluumaadka si kale loo dhigo, ama codsan kartaa in macluumaadka lagu bixiyo hab aad fahmayso.
- Haddii aad magacowday qof si uu kaaga caawiyo xaalado caafimaad, sida wakiilada daryeelka caafimaadka, ama u doodaha daryeelka caafimaadka, waxay kaa caawin karaan in aad go'aansato haddii tallaalku uu kugu habboon yahay.

Tallaalku wuxuu ina siiyaa rajo ah in cudurka baahsani uu joogsan doono, laakiin ilaa taasi laga gaarayo, waxaanu u baahanahay in aanu sii wadno tallaabooyin dhanka badbaadada ah si aanu uga ilaalino in fayrasku faafo: xiro maaskaro, ka fogow dadka kale, gacmahaaga dhaq, isla ilaali isku imaanshaha, oo guriga joog marka aad jiran tahay.

Sidee Baan Wax Dheeraad Ah U Ogaan Karaa?

Qorshaha Isku xigiinta Wajiga 1a ee Tallaalka Oregon:

<https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le3527.pdf>

Maamulka Caafimaadka Oregon ee Tallaalka COVID-19:

<https://covidvaccine.oregon.gov>